



## Qalabka Kaadhka Dhibcaha Saboolnimada ee Jabuuti

Mark Schreiner iyo Jean Paul Sossou

15'ka Nofeembar 2023

Ce document en Français et [l'application de collecte des données](#) sont disponibles sur [scorocs.com](#)

This document and a [data-collection app](#) are in English at [scorocs.com](#)

Kaadhkan dhibcaha iyo [appka-ururinta xogta](#) oo ku qoran afka soomaliga waxaad ka heli kartaa halkan [scorocs.com](#)

Qalabka Kaadhka Dhibcaha Scorocs ee qiimaynta saboolnimada (*the Scorocs® Simple Poverty Scorecard®-brand poverty-assessment tool*) waa mid qiimihiisu hooseeyo ama jaban yahay, qaab daahfurnaana ah oo loogu tala galay barnaamijyada lagu yaraynayo faqriga ama saboolnimada ka jirta Jabuuti si markaa ay si fiican ugu bartaan ka qaybgalayaashooda si markaa loo horumariyo waxqabadkooda bulsho ahaaneed. Jawaabaha kaadhka dhibcaha ee lambar 10 waxa loo isticmaali karaa:

- Qiimee heerka saboolnimada iyo tirooyinka dadka saboolka ah ee ka qaybgalayaasha soo socda
- La soco isbadalada saboolnimada ee ka qaybgalayaasha socda
- Qaybta ka qaybgalayaasha ee daawaynta kala duwan oo lagu saleeyey saboolnimada

### Mahadnaq

Xogtan waxay ka timid Direction de la Statistique et des Études Démographiques ee Jabuuti. Waxa loo mahadnaqayaa Sekou Tidiani Konate, Omar Abdoukader M., iyo Idriss Ali Sultana.

# Scorocs® Qalabka Kaadhka Dhibcaha Saboolnimada

Aqoonsiga waraysiga:	_____	<b>Magaca oo dhamaystiran</b>	<b>Aqoonsi</b>
Taariikhda waraysiga:	_____	Diiwaanka ka qaybgalaha: _____	_____
Wadanka:	DJI	Wakiilka adeega: _____	_____
Kaadhka dhibcaha:	001	Goobta adeega: _____	_____
Miisaanka tijaabada:	_____	Tirada xubnaha qoyska: _____	_____

Su'aal	Jawaab	Darajada
1. Gobolkee ama dagmadee ayaa qoysku ku noolyahay? (aqoonta ama garashada tiriyaha)	A. Tojora B. Dikhil C. Cali Sabiix D. Dagmada (2'aad ama 4'aad) E. Obokh, ama Dagmada (3'aad ama 5'aad) F. Carta, ama Dagmada 1'aad	0 5 8 9 11 14
2. Imisa xubnood ayaa qoysku ka koobaanyahay? (bogga danbe ee xaashida shaqada)	A. Sideed ama ka badan B. Todoba C. Lix D. Shan E. Afar F. Sadex G. Laba H. Hal	0 6 10 15 20 24 31 40
3. Todobadii maalmood ee ugu danbeesay xubin ama qof ka mida qoyska oo da'diisu tahay 5-sano ama ka wayn uu ka shaqeeyay ugu yaraan hal saac ganacsi ama iskiiba uu shaqeeyey, xoogiisa uu ku shaqaystay ama uu adeeg u fidiyay qoys kale ama uu u sameeyey lacag qoyskiisa/qoyskeeda ama uu ka shaqeeyay shaqo lacag la bixinayo ama bilaasha? (bogga danbe ee xaashida shaqada)	A. Maya B. Haa	0 5
4. Madaxa labka (ama gabadha ninkeeda madaxa) akhri oo qor?	A. Maya B. Maya madax lab (oo madaxa dhadig ee qoysku malaha nin ama lama qabo) C. Haa	0 2 4
5. Imisa qol ayay isticmaalaan qoysku? (Oo aanay ku jirin suqduudka, kiniifka lagu maydho, kabadhka, qolalka istoodhka ah, iyo qolalka loo isticmaalo kaliya ujeedooyinka ganacsiga.)	A. Hal B. Laba C. Sadex ama ka badan	0 3 8
6. Waa maxay waxa ay ka samaysantahay daarada guriga dhexdiisu? (sida tiriyuhu ku arkay indhihiisa)	A. Uskaga ama kale B. Sibidh C. Loox, ama marmar	0 3 7
7. Waa maxay isha rasmiga ah ee uu qoysku ka helo biyaha?	A. Wabi, biyaha durdurka ah, biyaha roobka, dhaamka, biyo meel lagu kaydiyey, biyaha dhulka hoostiisa lagu kaydiyey, ceel aan si fiican u dhisnayn, ceel si fiican u dhisan (aan lahayn mishiin biyaha soo qaada), ceel biyood (ceel leh mishiin biyaha soo qaada), booyada biyaha, baambada biyaha ee dadwaynaha, ama kuwa kale B. Dayrka guriga daganaanshiyaha waxa ku jira baambada biyaha ee ONEAD ama biyaha ceel biyoodka C. Baambadabiyaha ay bixiso ONEAD ayaa ku jira guriga gudihisa	0 5 7
8. Qoysku ma leeyahay tilifisiyoo?	A. Haa B. Maya	0 3
9. Laydhka ama nalka guriga ku jira ma waxa weeyaan kan ay bixiso EDD?	B. Maya A. Haa	0 3
10. Imisa moobilka gacanta ah ama fooniye ayaa qoysku haystaa?	A. Midna B. Hal C. Laba ama ka badan	0 5 9

## **Bogga Danbe ee Xaashida Shaqada** **Xubnaha Qoyska, Da'da, iyo Xaalada Shaqada**

Buuxi xaga sare ee kaadhka dhibcaha marka hore. Ku dar aqoonsiga gaarka ah ee waraysiga qaadaha (hadii la garanayo), taariikhda waraysiga, iyo miisaanka tijaabada ee ka qaybqaatayaasha qoyska (hadii la garanayo). Ka dib diiwaangali magaca oo dhamaystiran iyo lambarka aqoonsiga gaarka ah ee ka qaybqaataha (ee laga yaabo inuu ka duwan yahay jawaab bixiyaha), ee wakiilka adeeg bixiyaha ee ka qaybqaataha diiwaanka (laga yaabo inuu ka duwan yahay adiga tiriyaha) , iyo goobta adeega ee ka qaybqaataha diiwaanku isticmaalayo (hadii ay jirto oo la yaqaano). Goobaabin gali jawaabta su'aasha ugu horaysa ee kaadhka dhibcaha adigoo ku salaynaya waxa aad ka taqaano ama ka garanayso gobolka ama dagmada qoysku ku noolyahay, adigoo aan waydiin jawaab bixiyaha.

Kadib u akhri jawaab bixiyaha: *Fadlan ii sheeg magaca koowaad (ama naanaysta) iyo da'da xubin kasta oo qoyska guriga dagan ka mid ah, adigoo ku bilaabaya madaxa iyo isaga/iyada (ugu da'da wayn) xaaska/lamaanaha aan isqabin ee saaxiibka ah (hadii uu jiro). Qoyska waa waa koox dad ah (iyadoo aan loo eegayn xidhiidhka wada dhalasho ama guur ee ka dhexeeya) oo u aqoonsan hal xubin inuu yahay madaxa qoyskooda. Xubnaha qoyska waxa ay gabi ahaanba ama qayb ahaan wada qaybsadaan dakhligooda waxaanay wadaagan ama wada qaybsadaan kharashaadka. Caadi ahaan, xubnaha qoysku waxa ay kuwada noolyihiin hal guri ugu yaraana hal mar ayay meel wax ku wada cunaan maalintii. Deegaanku wuxuu noqon karaa qayb ka mid ah hal dhisme, gabi ahaanba hal dhisme, ama ka badan hal dhisme. Hal qof oo kalidii nool (aan guursan, carmal, ama nin ay xaaskiisi kala tageen) si madax banaan ugu nool waxa uu isagu shaqaysto ama dakhligiisa/dakhligeeda waa madaxa qoys ka kooban hal qof. Xubin qoyska ka mid ah waa inuu la noolaa xubnaha kale ee qoyska wax ka badan lix bilood marka laga bilaabo taariikhda waraysiga ama uu hadaba la noolyahay qoyska oo uu qorsheynayo inuu lasii noolaado ama lasii joogo mudo ugu yaraan lix bilood ah.*

Qor magaca iyo da'da xubin kasta, marka hore madaxa ka dibna xaaskiisa/ninkeeda (hadii uu jiro). Looma baahna in lagu adkaysto da'da sax ahaaneed hadii aanay ku dhawayn shan. Diiwaan gali lab ama dhadig ka uu yahay madaxu iyo lab ama dhadig ka uu yahay xaaskiisa/ninkeeda (hadii uu jiro). Xubin kasta da'diisu tahay 5-sano ama ka wayn, waydii: "7dii maalmod ee lasoo dhaafay, miyaa [MAGACA] uu shaqeeyay ugu yaraan hal saac . . .?", oo diiwan ka gali jawaabta.

Marka aad dhamayso dhamaan xubnaha qoyska, tirada xubnaha gali diiwaanka kaadhka dhibcaha ee ku xiga "Tirada xubnaha qoyska". Ka dib goobaabin gali jawaabta su'aasha labaad ee kaadhka dhibcaha. Diiwaanka gali jawaabta su'aasha sadexaad ee kaadhka dhibcaha iyadoo loo eegayo in xubin qoyska ka mid ah da'diisu tahay 5-sano ama ka wayn uu shaqeeyo. Kor u akhri labada su'aalood ee ku xiga ee ku saabsan aqoonta akhrinta iyo qoraalka ee madaxa labka ah iyo tirada qolalka. Hadii aad arki karto jawaabta su'aasha lixaad ee kaadhka dhibcaha ee ku saabsan waxa ay ka sameesantahay daaradu, markaa diiwangali adigoo aan waydiin jawaab bixiyaha. Waydii kaliya jawaab bixiyaha hadii adigu aanad si xaqiiqa ah oo dhamaytiran u arkayn. Ugu danbayn, kor u akhri afarta su'aalood ee ugu danbeeya.

Had iyo jeer maskaxda ku hay oo ku dhaqan ama adeegso tilmaamaha waraysiga faahfaahsan ee ku jira.

<b>Magaca koowaad ama naanaysta?</b>	<b>Madaxa ama xaaska madaxa?</b>	<b>Waa imisa jir [MAGACA]?</b>	<b>Hadii [MAGACA] uu ugu yaraan yahay 5-sano jir, markaa waydii: "Todobadii maalmod ee ugu danbeesay, miyaa [MAGACA] uu ka shaqeeyay ugu yaraan hal saac ganacsi ama iskiiba uu shaqeeyey, xoogiisa uu ku shaqaystay ama uu adeeg u fidiyay qoys kale ama uu u sameeyey lacag qoyskiisa/qoyskeeda ama uu ka shaqeeyay shaqo lacag la bixinayo ama bilaasha?"</b>		
1.	Madaxa (lab) Madaxa (dhedig)		5 sano ka yar	Maya	Haa
2.	Xaaska (dhedig) Xaaska (lab) Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
3.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
4.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
5.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
6.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
7.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
8.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
9.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
10.	Xubin kale		5 sano ka yar	Maya	Haa
<b>Tirada xubnaha qoyska:</b>	—	—	<b>Qofna miyuu shaqeeyaa?</b>		Maya Haa

